Dajinta Hadafka Waxbarashada

Ilmahaagu waxa uu ka soo baxay shuruudaha Qorshaha Waxbarashada ee Ardayga U Gaarka Ah (IEP). Maxaa ku xiga? Waxa aad la kulmeysaa kooxda IEP si ay u dajiyaan hadafka ilmahaaga. Kooxda IEP waxa ay ka kooban tahay xirfadlayaasha xagga waxbarashada ah, shaqaalaha dugsiga, waalidiinta, ardayga (14 sano iyo wixii ka weyn), iyo dadka kale ee aqoonta u leh ilmahaaga.

Waa Maxay Hadafku?

Hadafka sanadlaha ah waa warbixin ay qoreen kooxda IEP oo ay isku raaceen in ay ku haboon tahay in ilmuhu isku dayo inuu ku gaaro muddo sanad ah meelaha uu ilmuhu uga baahan yahay caawinaad. Hadafka waxaa loo dajiyaa si loo cabiro horumarka laga gaaro dhinaca waxbarashada iyo wax qabadka. Maadaama hadafka loo qoray baahida gaarka ah ee ilmahaaga, kooxdu waa mid awood u leh in ay isbedel ku sameyn karaan hadafka. Waalidka ayaa door balaaran ku leh abuuritaanka hadafkan.

Talaabooyinka Dajinta Hadafka

Qodobada uu ka kooban yahay: Hadafka sanadlaha ah waxa uu ka kooban yahay:

1. Gaaritaanka Heerka Waxbarashada ee Xilligan Iyo Waxqabadka QOF Ahaaneed (PLAAFP), iyo
2. Hadafka sanadlaha ah.

Heerka ardaygaagu marayo ee xilligan ayaa fure u ah in la xaqiijiyo gaaritaanka hadafka waxbarasho iyo dhaqdhaqaaqa ee baahida ilmahaaga. Ilmaha lagu sameeyo qiimeynta gaarka ah,hadafka waa inay jiraan waxyaabo lagu qiyaaso gaaritaanka hadafka ama ujeeddooyin mudada gaaban ah (STOs)
Kuwaas oo ah talaabooyin gaagaaban oo ka caawinaya in ardaydu gaaraan hadafkaas. Macluumaadka hoos ku xusan waa talaabooyinka la qaadayo si loo gaaro hadafkaas.

Gaaritaanka Heerka Waxbarashada ee Xilligan Iyo Wax qabadka QOF Ahaaneed (PLAAFP)

Gaaritaanka Heerka Waxbarashada ee Xilligan Iyo Waxqabadka QOF Ahaaneed (PLAAFP) waa mid ku saleysan qiimeynta xogta waa in ay noqotaa mid **si gaar** ah uga hadasha **sida** ay naafanimadu saameyn ugu yeelatay ardayga iyo heerka koritaanka ardayga. PLAAFP waa in ay ka jawaabtaa su'aalahan:

- Muxuu ilmuhu sameyn karaa?
- Sidee ayaa naafanimada ilmuhu saamayn ugu yeelatay ka qeyb galka iyo horumarka manhajka guud?
  (maadooyinka aasaaska ah (ama waxyaabaha ay ardaydu sameeyaan xilliga hore ee waxbarashada caruurta)?

Si ay PLAAFP u noqoto meel wax laga bilaabo, waa in ay noqotaa mid la qiyaasi karo, si loo cabiro horumarka ardaygu ku talaabsado.

Ujeedooyinka Mudada Gaaban (STO) ama Isbarbardhigga Waxqabadka

Ujeedooyinka mudada gaaban (STO) ama isbarbardhigga waxqabadka waxaa laga doonayaa oo kaliya ardayda lagu sameeyo qiimeynta gaarka ah. Hase yeeshee, waxaa kale oo loo adeegsan karaa mar kasta oo kooxdu dareemaan in ardaygu ka faa'iideysanayo. Ujeedooyinkaas waqtiga gaaban ah waxaa loo sii kala saaraa waxyaaba la qabanayo oo mid walba gaar u ah iyo talaabooyin muhim u ah sidii lagu gaari lahaa hadaf sanadeedka
Ujeedooyinka mudada gaaban ama isbarbardhigga waxqabadka waa kuwo caawinaya waayo:

- Waxaa lagu faahfaahiyaa waxyaabaha ardayga laga filayo inuu ka barto meel gaar ah waqti go'an.
- Waxaa lagu ogaadaa horumarka ilmuhu ku talaabsaday sidii uu u gaari lahaa hadafkaas.

Waa maxay waxyaabaha ka mid noqonaya IEP?

- **Hadafka sanadlaha ah**

Hadafka sanadlaha ah waxaa lagu faahfaahiyey dabeecadaha ama waxyaabaha ay kooxda IEP doonayaan in ardaygu barto ama horumar ka gaaro. Hadafku waa inuu noqdo mid la cabiri karo oo faahfaahinaya waxyaabaha ardaygu ay suurogal tahay inuu baran karo muddo 12 bilood ah.

- **Hadafka La Doonayo Ee Dheeraadka Ah**

Waxaa kale oo waajib ah in u gudubka IEP ay jiraan ujeedooyin dheeraad ah oo la cabiri karo. Inta badan waa kuwo qoraal ah. Ardaygu ku qoro erayo uu la yimid.

- **Ujeedooyinka Waxbarashada**

Qoritaanka hadafka la cabiri karo ee sandlaha ah (iyo ujeedooyinka mudada gaaban ama isbarbardhigga waxqabadka ee ardayda lagu sameeyo qiimeynta gaarka ah) waa qeyb oo ka mid ah nidaamka IEP. Hadafka sanadlaha ah waa dareenka laga qabo wax ka qabshada baahida ilmaha ee u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegga la xiriira. Ujeedooyinka waa kuwo ku wajahan:

1. Yareynta faraqa u dhaxeeya awoodda ilmaha iyo heerka waxbarashada ee xiligan. Heer wax qabadka ee la gaaray iyo sida loo qabtay.
2. Ilmaha oo laga caawiyo kordhinta awoodda wax qabashada.

Ujeedooyinka sanadlaha ah (iyo ujeedooyinka mudada gaaban ama isbarbardhigga waxqabadka) waxa ay u taagan yihiin dadaalka la doonayo in lagu jiheeyo wax ka qabashada baahida ardayga sida ku xusan IEP. Waxa ay xoogga saaraan yareynta dhibaatooyinka ka dhasha naafanimada ilmaha ee saameynta ku yeelanaya waxbarashada ama ku guuleysashada waxbarashada.

Noocyada Ujeedooyinka Waxbarashada

Inta badan ujeedooyinka waxbarashada waa kuwo hoos yimaada mid ama laba ka mid ah kuwa soo socda:

- Waxbarashada – akhriska, qoraalka afka, hingaadda, xisaabta, sayniska.
- Isku filnaashaha – cuntada, labiska, dukaan iibsiga, safarka, amaanka, miisaaniyadda
- gacan ka qabashada – raacista bushkuleetiga, booditaanka, gacan qoraalka, guluuska iyo shinsheer xirashada
- Xirfadaha bulshada/dareenka – wadaagista, saaxiib sameynta, isku dayga waxyaabo cusub, ilko cadeynta, ka jawaabista faduulinta.
- Xirfadaha gacan qabashada – raacitaanka tilmaamaha, dhameystirka shaqada, isticmaalka qalabka, kala doorashada, xirfadaha bulshada ee looga baahan yahay goobaha shaqada
- Dabeecadda – la dhaqanka gardareysiga, ku taagnaanta hawsha, raacista tilmaamaha, hab dhaqanka ku haboon fasalka, iyo la socoshada dareenka.
- Hadalka/xiriirka – barashada luqadda fara ka hadalka,ku dhawaaqidda hadalka, iyo xusuusta hadalka.

Xogta qiimeynta ayaa la adeegsaday si looga dhinacyada ay baahida ka jirto. Ujeedooyinka iyo adeegga ku haboon ee IEP waa in lagu gaaraa fariisinta fasalka uu u dhigmo ardaygu. Ka dib marka la qoro ujeedooyinka, oo go’aan laga gaaro baahida adeegga, kooxdu waa in ay is

weydiiyaan, ‘xagee ayaa ugu wanaagsan oo ardaygu ka heli karaa adeegga iyada oo aan culeys ku aheyn?’

Waxbarashada Guud iyo IEP

Baahida loo qabo fududeynta iyo wax ka bedelka barnaamijyada waxbarashada guud waa in wax laga qabtaa nidaamka loo dajinayo ujeedooyinka waxbarashada guud **waxaana laga yaabaa in ay qeyb ka noqon karaan IEP**. U fududeynta iyo wax ka bedelidda waa mid ku saabsan manhajka guud iyo sidoo kale qiimeynta gobolka iyo degmada. **Si ardaygu u adeegsan karo u fududeynta qiimeynta gobolka iyo tan degmada, u fududeyntu waa in ay noqotaa mid lagu qoray IEP loona adeegsado fasalka si joogta ah.**
U Fududeynta waa isbedelka sida—habka loo sameeyo waxyaabaha inta badan laga qabto dugsiga/fasalka/qiimeynta, si ardayda loogu fidiyo fursad ay u siman yihiin oo ay kaga qeyb qaataan. Isbedelka aan asalka aheyn ama saameyn balaaran aan ku laheyn ama hoos loo dhigo heerka dugsiga, degmada, ama gobolka. Ardayda baraneysa wax isku mid ah (manhajka guud) sida ardayda kale.

Tusaalayaal Fududeynta

- Hawlaha loo dirayo oo loo kala jajabiyo qeybo yaryar. Xusuusin joogta ah.
- Kordhinta waqtiga la doonayo in lagu dhameystiro hawsha loo diro.
- Imtixaanka oo afka looga qaado. Mudada uu imtixaanka ku dhameystiro oo loo kordhiyo.
- Ardayda oo la siiyo nuqul ka mid ah qoraalada fasalka. Isticmaalka farshaxan loo adeegsado in lagu sameeyop qoraalka fasalka.
- Ardayga oo la fariisiyo meel aanay jirin wax mashquulinaya. Fasalka oo samaacado iyo makarafoon lagu isticmaalo.
- In qoraalka kale habab kala duwan loogu soo bandhigo sida far xardhan ama cod ahaan.